

La soo saaray: 05 Abriil 2017


Xilligii Guga sanadka 2017 wuxuu ka bilowday qaybo ka mid ah Soomaaliland intii lagu guda jirey toddobaadkii laga soo gudbay ee Maarso iyadoo qaybaha koonfureed ee Gobolka Awdal la diiwaaniyey roobab mahiigaan ah oo ku fidsanaa shan maalmood. Tani waxay keentay in degdeg looga soo kabsado cadaadiskii deegaanka biyaha ka haystay. Qaybaha kale ee dalka waxaa la filayaa in ay bilaabato helitaanka roobabkii Guga marka la gaaro bartamaha Abriil.

Saadaasha roob-da'idda maanta (Khariidad 1) waxay muujinaysaa roobab fudud oo gaaraya ilaa 20mm gudaha Gobollada Koonfureed, qaybo ka tirsan Soomaaliland iyo Buuraleyda sare ee Itoobiya. Roobabka waxaa la filayaa inay ku kordhaan isla deegaannadaan ilaa dhammaadka toddobaadka sida lagu arkayo gudaha Khariidadda 2 taas oo sax uun ku ah ilaa 11 Abriil 2017. Xoogaa ama roob la'aan ay la saadaalinayaa gudaha Puntland iyo Gobollada Dhexe inta lagu guda jiro muddada la odorosay.

Waxaa si maalinle ah loo cusboonayn doonaa heerarka webiga iyo roob-da'idda oo laga helikari doonaa gudaha xiriirkaan: <http://systems.fao.net/frrims/>

**Khariidad 1: Saadaasha roob-da'a 24 saac
(Sax waxay tahay ilaa 05 Abriil 2017)**

**Khariidad 2: Saadaasha roob-da'a 7- Maalin oo la kulmiyey
(Sax waxay tahay 05 ilaa 11 Abriil 2017)**



Xog-cusboonaynta waxaa soo saara FAO: Maaraynta Macluumaadka Biyaha iyo Dhulka Soomaaliya – SWALIM. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxsoosaarka fadlan kala xiriir SO-hydro@fao.org ama eeg <http://www.faoswalim.org>

SWALIM Technical Partners



SWALIM Funding Agencies

